Casharka 33

1. Muxuu Ilaah Muuse ka ballanq-qaaday markii uu Muuse kala hadlay duurka kubanaya ee uu joogay Buur Siinay?
-Ilaah wuxuu ka ballan-qaaday inuu Muuse mar kale keeni doono Buur Siinaay.

2. Miyaa Ilaah dhowray ballankiisii ahaa inuu Muuse ku soo celiyo Buur Siinaay?
-Haa.

3. Maxaa Ilaah ku yiri Muuse markii uu joogay buurta dusheeda?
-Ilaah wuxuu doonayey inuu cahdi la dhigto reer binu Israa'iil.

4. Muxuu ahaa cahdiga Ilaah doonayey inuu la dhigto reer binu Israa'iil?
-Ilaah wuxuu yiri, haddii reer binu Israa'iil ay addeecaan shrciyadiisa oo dhan, dabeeto iyaga wuu barakadaynayaa.

5. Haddii reer binu Israa'iil ayan addeecin amarradiisa oo dhan, dabeeto muxuu Ilaah samaynayaa?
-Ilaah wuu ciqaabayaa iyaga oo dhan.

6. Maxay haddaba reer binu Israa'iil ku yiraahdeen Ilaah?
-Waxay reer binu Israa'iil ku yiraahdeen Ilaah waxaannu yeelaynaa ama addeecaynaa Amarrada Ilaah ood han.

7. Miyaa Israa'iil ay la ahayd inay addeeci karaan amarrada Rabbiga oo dhan?
-Haa.

8. Maxaa sabab u ahaa in reer binuIsraa'iil ay ku fikiraan inay



wada yeeli karaan Amarrada Ilaah oodhan?
-Waayo waxay ahaayeen kuwo qab weyn oo kibir badan.

9. Miyaa haddaba reer binu Israa'iil ay awoodeen inay wada addeecaan Amarrada oo dhan.
-Maya.

10. Waa maxay asbaabta reer binu Israa'iil ay u awoodi waayeen inay adeecaan Amarrada Rabbiga oodhan?
-Waayo waxay ka soo farcameenAadan iyo Xaawo.
-Waayo waxay ahaayeen addoommada dembiga.
-Waayo waxay kaloo ku dhasheen inay gunnimo Shayddaanka ugu hoos jiraan.

11. Miyaa Ilaah garanaya in reer binu Israa'iil aanay awoodin inay addeecaan amarradiisa oo dhan?
-Haa.

12. Haddii Ilaah garanayo in reer binu Israa'iil ayan awoodin inay raacaanamarradiisa oo dhan, maxaa Ilaah u doonayaa inuu reer binu Israa'iil Cahdi la galo?
-Ilaah wuxuu doonayaa inuu iyaga cahdi la galo waayo wuxuu doonayaa inuu reer binu Israa'iil wax baro.

13. Maxaa Ilaah ka doonayaa inuu baro reer binu Israa'iil?
-Ilaah wuxuu doonayaa inuu reer binu Israa'iil baro inaanay awood u lahayn inay addeecaan amarradiisa oo dhan.
-Ilaah wuxuu doonayaa inuu reer binu Israa'iil baro inaanay awood u lahayn inay amarrada ood han wada yeelaan waayo dhammaantood reer binu israa'iil waxay ku dhasheen dembi, sida innaga oo kale.

-Ilaah wuxuu doonayey inuu reer binu Israa'iil baro, maaddaama ayan awoodin inay amarradiisa ood han wada addeecaan, Ilaah keliya inuu awoodo inuu iyaga ka badbaadiyo dhimashada.

14. Maxay haddaba reer binu Israa'iil uu dhimanayaan haddii ay taabtaan Buur Siinaay?
-Waayo Ilaah wuxuu kor imanayaa buurta.
-Waayo Ilaah waa qoduus.
-Waayo Ilaah wuxuu neceb yahay dembi oo dhan.
-Waayo Ilaah wuxuu ku ciqaabaa dembi oo dhan dhimasho.

15. Maxay ahaayeen haddaba calaamadihii onkodka, hillaaca, qiica, iyo dabka?
-Waxay tilmaamayaan in Ilaah qoduus yahay.
-In Ilaah neceb yahay dembiga oo dhan.

-Iyo in Ilaah dembi oo dhan uu ku ciqaabo dhimasho.

-Markii uu Ilaah la hadlay kaddib, ayaa Muuse ku soo laabtay buurta hoosteea.

-Waxaa weli sii soconayey onkodka, oo wuxuu gilgilay hareeraha Buur siinaay.

-Hillaaca wuxuu buuxiyey dhulkii ku hareeraysnaa buur Siinaay.

-Buurtii oodhan waxaa hareeyey qiic
-Weliba waxaa sii socday in buurtu ay gilgilato.

-Reer binu Israa'iil waxay ka dheeraadeen buurta, waayo aad iyo aad bay u baqeen.



-Dabadeedna Ilaah baa iyaga kala hadlay buurta.

-Waxaana Ilaah ku yiri:

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:1-2

1-Markaasaa Rabbigu erayadan ood han ku hadlay, Isagoo leh.
2-Anigu waxaan ahay Rabbiga Ilaahaaga ah, oo kaa soo bixiyey dalkii Masar iyo gurigii addoonsiga.

-Isagoo haddaba jooga Buur Siinay dusheeda, ayaa Ilaah siiyey reer binu Israa'iil toban amarradood.

-Amarkii kowaad ee Ilaah siiyey reer binu Israa'iilna wuxuu ahaa sidatan hoos ku qoran.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:3

3-Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanand lahaan.

-Amarkii kowaad, Ilaah wuuu iyaga ku amray in isaga oo keliya inuu Ilaahooda yahay.

-Maxaa haddaba Ilaah oo keliya u noqonayaa Ilaahenna?

-Waayo waxaa jira hal Ilaah.
-Waayo ma jiro Ilaah kale.

-Markii aynu ruuxyo wax weyddiisanno, ruuxyadii ayaannu Ilaah hor geynaynaa, wxaanan jebinaynaa amarkan.

-Markii aynu ku kalsoonaanno xirsiyada, dabeeto xirsigii ayaannu Ilaah ka soo hor-marinaynaa, oo waxaannu jebinaynaa amarkan.

-Markii aynu qaadno dariiqeenna, intii aynu dariiqa Rabbiga raaci lahayn, dabeeto Ilaah baannu ka hor marinaynaa nafsaddayada, waxaanan jebinaynaa amarka sddexaad.

-Ilaah wuxuu leeyahay dadka ood han waxay jebiyeen amarkan.

-Haddaba ciqaabta ay leedahay in amarkan la jebiyo waxay keenaysaa inaynu ku dhex dhimanno harada dabka ah ee weyn.

-Waa kan amarkii labaad ee Ilaah ina siiyey

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:4-5

4-Aa inaanad samaysan sanam xardhan, ama waxa biyaha dhulka ka hooseeya ku jira.
5-Waa inaanad iyaga u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah, waxaan ahay Ilaah Xaasid ah, oo xumaantii awowayaasha waxaan soo gaadhsiinayaa carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb.

-Sharciga labaad, Ilaah wuxuu inagu amrayaa inaynaan samaysan wax u eg sanam alwaax ah oo xardhan, ama dhagax la xardhay iyo weliba inaan la caabudin.

-Maxaa sabab u ah oo aynaan u samaysanaynin wax Ilaah lagu masliyo?

-Waayo Ilaah waa Ruux.



-Ilaahna uma eka sida dad, ama xayawaan, ama sida shimbir.

-Markii aynu caabudno qaar ka mid ah waxaalihii la abuuray intii aynu caabudi lahayn Ilaah, dabeeto waxay soo hor-marinaynaa waxyaalihii la abuuray intaynu Ilaah soo hor-marin lahayn, markaasaannu jebinaynaa amarkiisan.

-Marka kaynaan Ilaah caabudin maalin waliba, ha yeeshee aynu ku soconno fikirrada kuwa kale, dabeeto waxaannu jebinaynaa amarkan.

-Ilaah wuxuu leeyahay dadka oo dhan waxay jebiyaan amarkan.

-Ciqaabta u dhigan jebinta amarkan waa dhimasho, oo waxaa qofka lagu tuurayaa ruuxiisa harada dabka aan demayn ama cadaabta.

-Waxaa halkan yaalla amarkii saddexaad ee Ilaah ina siiyey.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:7

7-Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbig eedlaawe u haysan maayo kii magaciisa si been ah ugu hadal qaada.

-Markii aynu soo gaarno amarka saddexaad, Ilaah wuxuu inagu amrayaa inaynaan magaciisa si aan macna lahayn u soo hadal qaadin.

-Maxaa loo xushmaynayaa magaca Rabbiga.

-Waayo magaca Rabbiga iyo Ilaah waa isla mid.

-Magaca Rabbiga iyo Ilaah waa isku mid.

-Markii aynaan magaca Rabbiga si xushmad leh u hadal qaadin, Markaa haddaba Ilaah xurmayn mayno, oo waxaannu jebinaynaa amarkiisan.

-Markii haddaba aynu magaca Rabbiga si aan xushmad lahayn u soo magac qaadno, waxaannu Rabbiga u qiimaynaynaa si aan macno lahayn, oo waxaynu jebinaynaa amarkiisa.

-Marka ay sidaas tahay waa wax aad iyo aad u xun in dhallaan uusan xushmaynin kan ka weyn.

-Isla sidoo kale waa wax xushmad darro ah in qofku aanu Ilaahii uumay qadarinin.

-Ilaah wuxuu leeyahay dadka oo dhan waxay jebiyeen amarkan.

-Ciqaabta jebinta amarkan waa dhimashada nafta lagu ridayo jahannamada dabka ah.

-Waxaannu soo gaarnay haddaba amarkii afraad ee Ilaah ina siiyey.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:8-11

8-Xusuuso maalinta Sabtida, inaad qoduus ka dhigto.
9-Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dahn qabsataa.
10-Laakiins emaalinta toddobaad waa maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanand shuqul qaban, adiga, iyo wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga, ama addoontaada,



ama xoolahaaga, ama qariibka irdahaaga ku jira.
11-Waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakadeeyey maalintii sabtida ahayd oo qoduus uga dhigay.

-Marka aynu ku jirtno amarka afraad, Ilaah wuxuu inagu amrayaa inaynu m aalinta toddobaad ka dhigno maalin nasasho.

-Maxaa sabab u ah inaynu nasanno hal maalin toddobaadkiiba?

-Waayo Ilaah wuxuu samada iyo dhulka ku abuuray lix maalmood, dabadeedna wuxuu nastay maalintii toddobaad.

-Ilaah wuxuu inagu amrayaa inaynu nasanno maalinta toddobaad si aynu uga fakarno waxyaalaha Ilaah innaga inoo abuuray ee aynu dunida ku dhex aragno.

-Markii aynaan nasanin oo aynu ka fakarno Ilaah, dabeeto waxaannu jebinaynaa amarkiisa.

-Markii haddaba aynaan nasanin, balse aynu ka fakarno waxaabaha Ilaah inoo sameeyey, waxaannu jebinaynaa amarkan sabtida.

-Ilaah wuxuu leeyahay dadka oo dhan waxay jebiyeen amarkan.

-Ciqaabta jebinta amarkani leeyahay waa dhimashada lagu abaadayo harada dabka weligiis qaxmaya ama cadaabta.

-Halkan waxaa yaalla amarkii shanaad ee Ilaah siiyey dadkiisa.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:12

12-Aabbahaa iyo hooyadaa Maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo.

-Haddaba amarkan shanaad, Ilaah wuxuu inagu waajibinayaa inaynu maamuusno Aabbaheen iyo hooyadeen.

-Maxaynu u xushmaynaynaa Aabbaheen iyo hooyadeen?

-Waayo Ilaah wuxuu Aabbayaasha iyo hooyooyinka siiyey masuuliyadda ah inay ubadka koriyaan.

-Markii haddaba aynaan adeecin aabayaasheen, markaa waxaynu jebinaynaa amarkan shanaad.

-Ilaah wuxuu leeyahay dadka oo dhan waxay jebiyeen amarkan shanaad.

-Ciqaabta jebinta amarka shanaadna waa dhimashada dabka aan daa'iman damaynin ama cadaabta.

-Waxaa kaloo halkan yaalla amrkii lixaad ee Ilaah ina siiyey.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:13

13-Waa inaanad qudh gooyn.

-Amarkan lixaad, Ilaah wuxuu innagu amrayaa inaynaan dilin qof kale.

-Waa maxay sababta laynooga mamnuucay inaan qof kaleeto



dilno?

-Waayo Ilaah waa kan dadka nolosha siiya, waana kan Keliya ee nolosha qaadi kara.

-Ilaah wuxuu leeyahay haddii aynu neceb nahay qof, ugu dambaynta qofka aynu neceb nahay waynu dilaynaa.

-Haddaba haddii aynu qof nebcaanno, waxaynu jebinaynaa amarkan lixaad.

-Ilaah wuxuu leeyahay dadka ood han waxay jebiyeen amarkan.

-Ciqaabta jebinta amarkan waa dhimashada ruuxa la gelinayo dabka aan demeynin ama cadaabta.

-Waxaa haddaba halkan yaalla amarkii toddobaad ee Ilaah siiyey dadka.

Bal aynu akhrinno Bxniintii 20:14

14-Waa inaanad sinaysan.

-Haddaba amarkan toddobaad Ilaah wuxuu inagu waajibinayaa inaynaan la seexanin qof kale, qofka aad is-qabtaan mooyaane.

-Maxaa loo mamnuucay inaynu haddii aynu rag nahay naago kale la seexanno, hablahana looga mamnuucay inay rag kale la seexdaan?

-Ilaah wuxuu nin waliba siiyey hal naag, Halkii naagna waxay leedahay hal nin.

-Ilaah wuxuu leeyahay haddii aynu cid kale eegno, oo aynu damacno,  markaa waynu sinaysanaynaa.

-Ilaah wuxuu leeyahay dadka oo dhan waxay jebiyeen amarkiisa.

-Ciqaabta ay leedahay jebinta amarka Ilaahw axaa weeye in nafsadda ama ruuxa qofka lagu tuuro dab aan damaynin ama cadaabta.

-Halkan waxaa ku qoran amarkii siddeedaad ee Ilaah ina siiyey.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:15

15-Waa inaanand waxba xadin.

-Amarka siddeedaad waxaa weeye in Ilaah inagu xukumay inaynaan waxba xadign.

-Waa maxay asbaabta aynaan wax cid kale leedahay u qaadan karin?

-Waayo Ilaah baa iyaga siiyey fasaxa ah in wixii ay shaqays-teen ay iyagu leeyihiin.

-Ilaah wuxuu kaloo leeyahay, "Waa inaynaan damcin wax qof kale leeyahay," Haddii kale waxay noqonaysaa sida ynaynu xadayno oo kale.

-Markii aynu haddaba eegno wax qof kale leeyahay, oo aynu dambacno inaynu waxaas iyaga ah qaadanno, waxaannu jabinaynaa amarkii Rabbiga.



-Ilaah wuxuu leeyahay dadka ood han waxay jebiyeen amarkan.siddeedaad.

-Ciqaabta uu leeyahay jebinta amarkaas isaga ahna waa dhimashada Ruuxa ee lagu dhex ridayo qofka harada dabka aanu ololkiisu damaynin ama cadaabta.

-Waxaa inta yaalla haddaba amarkii sagaalaad ee Ilaah ina siiyey.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:16

16-Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin.

-Amarkan sagaalaad, Ilaah wuxuu inagu amrayaa inaynaan been sheegin.

-Waa sababta beenta loo xarrimay?

-Waayo beentu kama timaaddo Ilaah.
-Waayo Beenta waxaa sal u ah dembiga iyo Sahyddaanka.

-Markii aynaan haddaba sheegin runta ood han, markaa been baynu sheegaynaa, oo waxaannu jebinaynaa amarkan.

-Ilaah wuxuu leeyahay dadka oo dhan waxay jebiyaan amarradiisa.

-Ciqaabta jebinta amarkan waa dhimashada ruuxa qofka oo le gelinayo dabka qaxmaya ee aan demaynin ama cadaabta.

-Haatanna waxaannu soo gaarnay amarkii tobnaad.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 20:17

17-Waa inaanand damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan.

-Amarka tobnaad, Ilaah wuxuu inagu amrayaa inaynaan jeclaysan waxa dadka kale ay haystaan ama leeyihiin.

-Maxaynaan haddaba u doonaynin waxa dadka kale haystaan?

-Waayo Ilaah qudhiisa ayaa siiyey kuwa kale waxa ay haystaan.

-Haddii amrkaas aynu doonayno waxa dadka kale haystaan, waxaannu jebinaynaa amarkan.

-Ilaah wuxuu leeyahay dadka ood han waxay jebiyeen amarkan.

-Ciqaabta uu leeyahay jebinta amarkanu waxaa weeye dhimashada Ruuxa Qodka lagu tuurayo Dabka aan demayn ama cadaabta.

-Waxaa jira haddaba tobankan amarradood ee Ilaah siiyey reer binu Israa'iil.

-Amarkan Ilaah siiyey reer binu Israa'iil waa isla amar ay leeyihiin dadyowga ood han.

-Ma jiro qof wada yeeli kara amarrada Ilaah ama wada dhowri kara.

-Innaga oo dhan waxaynu jebinnay sharciyada Ilaah.



-Waa maxay ciqaabta ay leedahay jebinta tobanka amarradood?

-Waa dhimashada Harada dabka aan demayn.

-Waa maxay haddaba ciqaabta ay leedahay jebinta mid ka mid ah sharciyada?

-Waa dhimashada Ruuxa ee dabka aan demayn lagu tuurayo.

-Weliba haddii aynu wada yeelno amarrada Rabbiga, mid mooyaane, Ilaah wuxuu leeyahay iyaga oo dhan baa lagu xad-gudbayaa.

-Ilaa iyo meeqa goor ayuu Shayddaanku khilaafay Rabbiga ka hor intaan Shayddaanka Samada laga soo tuurin ee aan loo diyaarinin Dabak aan demayn ee ugu dambaysta isaga lagu tuuri doono?

-Hal goor buu Ilaah khilaafay.

-Shayddaanka qudhiisuba hal goor un buu xad-gudbay, Ilaahna isaga wuxuu ku ciqaabay dhimasho.

-Imisa goor bay malaa'igaha caasiyoobay ee raacay Shayddaanka Ilaah khilaafeen, waa kuwii Samada laga soo tuuray ee Cadaabta loo diyaariyey e?

-Hal goor?

-Malaa'igaha raaday Shayddaanka, waxay xad-gudbeen oo keliya hal goor, Ilaahna iyaga wuxuu ku xukumay dhimasho.

-Ilaa iyo imisa ayaa.

-Aadan iyo Xaawo ay Ilaah khilaafeen ka hor intaan laga soo eryin Beer Ceeden?

-Hal goor oo qura ayey xad-gudbeen.

-Aadan iyo Xaawo waxay Ilaah ku xad-gudbeen hal mar, Ilaahna wuxuu iyaga ku ciqaabay dhimasho.

-Ilaah waa qoduus markaa xitaa hal dembi waa inuu ku ciqaabo dhimasho.

-Sharciyada Rabbigu waa sida miraayad oo kale.

-Sidee baa qaynuunnada Ilaah loogu masaalay sida miraayad oo kale.?

-Waayo waxay ina tusaan dembiyadeenna.

-Waxay inagu caawiyaan inaynu aragno dembiyadeenna.

-Maxaa Ilaah inoo siiyey amarrada?

-Wuxuu inoo siiyey si uu inoogu muujiyo wasakhdayada, iyo qalbiga dembiga leh.

-Isla sida qofku uusan u arki karin wejigiisa wasakhda saaran ilaa uu miraayad isku eego mooyaane, innaguna arki mayn qalbiga wasakhda iyo dembiga leh, ilaa laynagu eego amarrada Ilaah mooyaane.

-Ilaah wuxuu sharciyadiisa u siiyey reer binu Israa'iil waxay ahayd inay arkaan sharka iyo sida qalbigoodu u dembi badan yahay.



-Maaddaama qalbigeennu daxalaystay oo uu dembi leeyahay, wax aynu samayn karno ma lahan inaynu Ilaah u nimaadno mooyaane.

-Maaddaama qalbigayagu uu wasakh iyo dembiga leeyahay, ma jirto si kale ee Ilaah inagu aqbalayo.

-Innaguna iskama nadiifin karno wasakhda qalbiga iyo dembiyada niyadaheenna ku jira.

-Waa kuma kan keliya ee nadiifin kara wasakhda qalbigeenna, iyo dembiyada niyadaheenna ku jira?

-Ilaah oo keliya.